

ISKAANKA CT OON LAHAYN SHOOCAACA

Bukaanka: _____ Taariikhda Balanta: _____

Waqtiga Imaanshaha: _____ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Waaxda Baaritaanka Raajada ee Mankato Clinic
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

Fadlan soomar Xafiiska Diiwaangalinta kahor intaadan imaan barta Baaritaanka Raajada.

Hadaadan awoodin inaad balanta ku timaado ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac (507) 389-8570.

Waa maxay raajada CT ee aan Shucaaca lahayn:

Baaritaankaan waa raajo qaas ah oo sawiro kumbuyuutaraysan kasoo qaadaysa meesha baaritaanka lagu samaynaayo.

Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:

- Kahor intaadan qabsan mudada baaritaankaaga, fadlan usheeg dhakhtarkaaga hadaad uur leedahay ama aad umalaynayso inaad uur qaadi karto.
- Majiraan xadidaado dhanka cuntada ah oo baaritaankaan keenaayo.
- Siiwad qaadashada daawooyinkaaga caadiga ah.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- Si aan kuusiino adeegyadeena ugu fiican aana uraaco talaabooyineena amaan ah intaad xarunteena joogto, waxaan si xushmad leh kaaga codsanaynaa inaan caruurta yaryari ayna usoo raacin waalidka meesha lagu baaraayo waxaana kaaga mahadcelinaynaa sida aad arrintaas noola qaadatay.

Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:

- Mashiinka iskaanka CT waa mid wayn kaasoo usamaysan sida mirta lawska.
- Waxaa lagu sheegi doonaa inaad iskasiibto wax kasta oo dahab ah iyo/ama jijimo ah kuwaasoo aad kaqabto meesha labaraayo.
- Waxaan lagaa codsanayaa inaad dhabarka ugu jiifsato miiska iskaanka.
- Wax cabitaan ah LAGUMA siinaayo.
- Wax cirbada xididka (IV) ah LAGUMA siinaayo.
- Baaritaankaagu wuxuu qaadanayaa kudhawaad 20 daqiiqo markaad gasho qolka iskaanka.

Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:

- Baaritaankaga waxaa fiirinaaya oona macluumaadka ka keenayaa dhakhtarka Raajada 24 saac ee kuxigga baaritaanka kadib.
- Natijoooyinka baaritaankaaga waxaad kahelaysaa barta bukaanka isla marka uu dhakhtarkaagu dhameeyo daraasaynteeda. Dhakhtarkaaga ayaa kaaga waramaaya natijoooyinka marka lagaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo diraa ama taleefan kaasoo wacaaya shan ilaa todobo maalmood gudahood.